



Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda

Miisaaniyadda Dawladda Dhexe ee 2024



Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Horumarinta
Maaliyadda



Republic of Somaliland
Ministry of Finance Development

Xafiiska Wasiirka

Ref: WM/02/08-01/ /2024

Date: 7-1-2024

Ku: Golaha Wakiiladda Jamhuuriyadda Somaliland

Hargeysa

UJEEDO: SOO GUDBINTA MIISAANIYADDA QARANKA EE 2024

Mudanane Gudoomiye, Gudoomiye ku xigeen iyo Mudanayaasha kale

Aniga oo ka wakiila Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda oo gudanaysa waajibaadka Dastuurka Qaranka Qodobkiisa 55^{aad} farqadiisa 1aad, iyo xeerka Maamulka Maaliyadda ee xeer no 75/2016 qodobkiisa 5^{aad}, waxan si weyn ugu faraxsanahay in maanta oo taariikhdu tahay 7-1-2024 idiin soo gudbiyo Miisaaniyadda guud ee Dawladda ee Sannadka 2024-ka oo ah Miisaaniyadii 33^{aad} ee Qarankani yeesho.

Dr. Sacad Cali Shire

Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda



TUSMADA BUUGA

JAMHUURIYADDA SOMALILAND	I
REPUBLIC OF SOMALILAND	I
1 HORDHAC	1
2 XAALADDA DHAQAALAHU GUUD EE DUNIDA	2
3 XAALADDA GUUD EE DHAQAALAHU SOMALILAND.....	3
3.1 Wax-Soosaarka Dhaqaalaha Guud (GDP)	3
4 HANTAAQOYINKA GUUD EE KU YIMID DHAQAALAHU CAALAMKA IYO KA MAXALIGA AH	4
4.1 Saamaynta Dhaqaale iyo Bulsho ee Dagaalka yukeyn-Saamaynta Caalamiga	4
4.1.1 Ganacsiga caalamiga ah	4
4.1.2 Siyaasaddaha lacagta	4
4.1.3 Adeegyada Maaliyadeed	5
4.2 Hantaaqooyinka Guud ee ku yimid Dhaqaalaha Somaliland	5
4.2.1 Saamaynta Dhaqaale iyo Bulsho ee Dagaalka Ukraine - Somaliland	5
4.2.2 Saamaynta Caalamiga ah ee Xanuunka Safmarka ah ee COVID-19	6
4.2.3 Saamaynta Gubashadii Suuqa Wajaale	6
4.2.4 Gubashadii Suuqa Waaheen	6
5 HALBEEGYADA DHAQAALAHU.....	7
5.1 Sicir-bararka	7
5.2 Sarrifka Lacagta	7
5.3 Xawaaladdaha	8
5.4 Ganacsiga	9
5.4.1 Dhoofinta Xoolaha	9
5.4.2 Wax-Soodejinta	10
6 SHAQAALAYSIIINTA DAWLADDA 2018 ILAA 2023	12
7 WARBIXINTA HAB-SAMI U SOCODKA MIISAANIYADDA 2023	13
7.1 Dakhli Uruurinta Jan-June 2023	13
7.2 Kharash-galka Dawladda Jan-June 2023	14
8 SIYAASADA MIISAANIYADA 2024	17
8.1 Siyaasada Mudnaanaha kharashka	17
8.2 Siyaasadaha kor loogu qaadayo dakhliga	17
9 GUUD MARKA ODORASKA DAKHLIGA 2024	18
9.1 Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2024	19
9.2 Odoros Dakhliga Kastamada oo Deegamaysan 2024	20
9.3 Odoros-ka Dakhliga Cashuuraha Berriga 2024 oo Deegamaysan	21



9.4 Isbarbardhiga Dakhliga dhabta ah ee Cashuuraha Berriga 2018-2023	22
10 FAAH-FAAHINTA KHARASHKA MIISAANIYADDA 2024.....	24
10.1 Saamiga Wadaagayaasha ee Miisaaniyadda 2024	24
10.1.1 Amaanka	24
10.1.2 Maamulka	25
10.1.3 Caafimaadka	26
10.1.4 Waxbarshada	26
10.1.5 Tamarta	26
10.1.6 Waxsoo-saarka	27
10.1.7 Deegaanka	27
10.1.8 Biyaha	28
10.1.9 Dhaqaalaha	28
10.1.10 Kaabayaasha Dhaqaalaha	28
10.1.11 Wadaagaha kale (cross-cutting Sector)	29
10.2 Soo Koobida Qeybaha Miisaaniyadda 2024	29
10.2.1 Kharashka Shaqaalaha	31
10.2.2 Karashka Alaabta & Adeegga Ama Hawl socodsiinta	31
10.2.3 Hantida Raagta	31
10.2.4 Mashaariicda Kale ee Dawladda	31
10.2.5 Kaalmooyinka & Daryeelka Bulshada ee Dawladdu Bixiso	32
10.2.6 Daynta Qaranka	32
10.2.7 Kharashka lama filaanka ah	32
11 MASHAARIICDA UU MAAL-GALINAYO BANGIGA ADDUUNKU MIIS.	
SANADKA 2024	33
11.1 Mashruuca horumarinta Maamulka khayraadka guud (enhancing public Resources management project (SERP)	33
11.2 Mashruuca Abaartire	34
11.3 Mashruuca Dib u Habeynta Shaqaalaha Dawladda	34
11.4 Mashruuca Tamarta (Somaliland Electricity Sector Recovery Project)	35
11.5 Mashruuca Barwaaqo (Barwaaqo Project)	35
12 MIISAANIYADDAHA DOWLADDAHA HOOSE IYO HAY'ADDAHA	
MADAXABANAAN EE 2024	36
12.1 Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxabanaan ee 2024	36
12.2 Miisaaniyaddaha Dowladdaha Hoose ee 2024	36
13 DAKHLIYADA MIISAANIYADDA KA BAXSAN EE AY QABATO	
W/H/MAALIYADDU	40



Liiska Shaxaha

Shaxda 1: Miisaaniyadda Guud ee Qaranka ee 2024	1
Shaxda 2: Kobaca Dhaqaalaha iyo Sicir-bararka Dunida 2022-2024	2
Shaxda 3: Celceliska Rubuclaha ah ee Sicir-bararka 2022-2023	7
Shaxda 4: Isbabardhigga Xaddiga Sarrifka Shilingka Somaliland iyo Doolarka oo Sadex-biloodle ah 2022-2023	8
Shaxda 5: Lacagaha la soo diray iyo kuwa laga diray Somaliland oo Bille ah iyo Saddex-Bilood ah 2022-2023	9
Shaxda 6: Is-barbardhiga Tirada Xoolaha Dhooftay Jan-June 2022-2023	10
Shaxda 7: Qiimaha Alaabta Soo Degtay Jan-June 2022-2023	11
Shaxda 8: Shaxda korodhka Tirada Shaqaalaha Dowladda 2018-2024	12
Shaxda 9: Isbarbar-dhiga Odoraska Dakhliga 2023-2024	18
Shaxda 10: Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2024	19
Shaxda 11: Ororoska Dakhliga Kastamada ee Miisaaniyadda 2024 oo Deegaamaysan	20
Shaxda 12: Odoraska Dakhliga Cashuuraha Berriga ee Miisaaniyadda 2024 oo Deegaamaysan	22
Shaxda 13: Soo Koobida Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miisaaniyadda 2024	24
Shaxda 14: Wadaagaha Amaanka iyo Difaaca	25
Shaxda 15: Wadaagaha Maamulka	25
Shaxda 16: Wadaagaha Caafimaadka	26
Shaxda 17: Wadaagaha Waxbarashada	26
Shaxda 18: Wadaagaha Tamarta	27
Shaxda 19: Wadaagaha Wax-soosaarka	27
Shaxda 20: Wadaagaha Deegaanka	27
Shaxda 21: Wadaagaha Biyaha	28
Shaxda 22: Wadaagaha Dhaqaalaha	28
Shaxda 23: Wadaagaha Kaabayaasha Dhaqaalaha	29
Shaxda 24: Wadaagayaasha Kale (Cross-Cutting Sector)	29
Shaxda 25: Soo Koobida Qeybaha Waaweyn ee Kharashka Miisaaniyadda 20224	30
Shaxda 26: Liiska Mashaariicda uu Maalgalinayo Bangiga Adduunku Miisaaniyadda 2024	35
Shaxda 27: Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxbanaan ee Sanadka 2024	36
Shaxda 28: Miisaaniyadda Dowladdaha hoose ee Sanadka 2024	37
Shaxda 29: Soo koobida Qeybaha Kharashaadka Dowladaha Hoose	37
Shaxda 30: Soo koobida Qeybaha Kharashaadka ee Degmooyinka Derejada "A" iyo % ay ka yihiin Miisaaniyadooda	38
Shaxda 31: Soo koobida Qeybaha kharashaadka Degmooyinka Derejada "A"	39



Liiska Jaantuusyada

Jaantuus 1: Wax-soosaarka guud ee Dhaqaalaha Somaliland iyo inta ku soo hagaagaysa qofkiiba 2013-2022	3
Jaantuus 2: Sicir-bararka Qeybaha Waaweyn oo Sanadle ah (Sanadka laga duulayo 2012)	7
Jaantuus 3: Heerka Sarrifka Shilinka Somaliland iyo Doolarka oo Bille ah 2023	8
Jaantuus 4: Lacagaha la soo diray iyo kuwa laga diray Somaliland oo Bille ah iyo Saddex-biloodle ah 2022-2023	9
Jaantuus 5: Wadarta Xoolaha Dhoofay Lix-biloodkii 2022-2023	10
Jaantuus 6: Qiimaha Alaabta Soo Degtay oo Bille ah 2022-2023 (Jan-June)	11
Jaantuus 7: Korodhka Tirada Shaqaalaha Dowladda 2018-2024	12
Jaantuus 8: Shanta shay ee ugu sareeya ee ka kor maray Odooraskii iyo Shanta shay ee ugu hooseeya ee ka hoos maray Odooraskii jan-june 2023	13
Jaantuus 9: Wadarta Dakhli Ururinta Jan-Jun 2023 iyo Hay'addaha ka Masuulka ah	14
Jaantuus 10: kharash-galka Dowladda oo Rubucle ah 2019-2023 SL\$ Billions	15
Jaantuus 11: Isbarbardhiga Qeybaha waaweyn ee Kharashka oo lixbiloodle ah (2022-2023)	15
Jaantuus 12: kharashgalka Wadaagayaasha ee lixbiloodka Jan-June 2023	16
Jaantuus 13: Soo Koobida Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2024	20
Jaantuus 14: Saamiga Goob waliba ka tahay wadarta guud ee Kastamada Miisaaniyadda 2024	21
Jaantuus 15: Saamiga Goog waliba ka tahay wadarta guud ee Cashuuraha Berriga Miisaaniyadda 2024	22
Jaantuus 16: Dakhli Uruurinta Cashuuraha Berriga ee 2018-2023	23
Jaantuus 17: Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miis 2024	24
Jaantuus 18: Soo Koobida Saamiga Qeybaha Miisaaniyadda 2024	30
Jaantuus 19: Saamiga Qeybaha kharashaadku ka yihiin Miisaaniyaddaha Dowladdaha hoose ee 2024	38

Liiska Appendices

Appendix 1: Dakhliga Miisaaniyadda ka baxsan ee ay qabato W/H/Maaliyaddu: Dakhliga dhabta ah Jan-Nov 2023 iyo Odooraska 2024	40
Appendix 2: Kharashka Miisaaniyadda ka baxsan ee ay qabato W/H/Maaliyaddu: kharash-galka Jan-Nov 2023 iyo Saadaasha 2024	40
Appendix 3: Liiska Dhismayaasha iyo Hantida Raagta ee Miis 2024	41
Appendix 4: Liiska Mashaariicda Biyo balaadhinta ee ka soo wareegtay Miis. 2024	45
Appendix 5: Liiska Mashaariicda Dhaamamka iyo Ceelasha ee ka soo wareegtay Miis. 2024	45
Appendix 6: Waxkabelka Liiska Tacriifadaha ee Wasaaradda Ganacsiga	45
Appendix 7: Tacriifada Sumada Gaadiidka Badda, buuga Gaadiidka iyo Wakaaladdaha (Commercial Plate) ee W/H/Jidadka	46
Appendix 8: kharashka codsiga diiwaangalinta Sanadkii ee shakhsiyaadka iyo shirdaha sameeya (environmental impact assessment)	46
Appendix 9: Khidmada Cusboonaysiinta Liisanka Sanadkii	46
Appendix 10: tacriifada Shirkadaha Macdanta, kuwa Ciida qoda Dhagaxa	47
Appendix 11: Ajuurooyinka Ruqsadaha Macdanta (Licenses) & Ogolaanshaha (Permits)	47
Appendix 12: xx Joint Adventure/Transfer Mineral Right/Wadaag /Wareejin	47
Appendix 13: Service License	47
Appendix 14: Permits/Ajuurada Ogolaanshaha	47
Appendix 15: Surface Rent Tax/Ajuurooyinka Kiradda	48
Appendix 16: Ajuurooyinka Ogonlaashaha Macdanta (Royalties)	48
Appendix 17: Precious Metal/Macdanaha qaaliga ah	49
Appendix 18: Cashuuraha Baadhida Muunadaha Macdanta ee laabka wasarada macdanta	51



Shaxda Miisaaniyadda Wasaaraddaha & Haya'addaha 2024

Difaaca	97
Nabadgelyada	99
Ciidanka Asluubta	101
Ciidanka Booliska	103
Ciidanka Ilaalada Xeebaha	105
Ciidanka Socdaalka	107
Ciidanka Dabdamiska	109
Wasaaradda Gaashaandhigga	111
Difaaca	113
Wasaaradda Biyaha	115
Komishanka Aids-ka Qaranka	117
Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka	119
Komishanka Mihnedlayaasha Caafimaadka	122
Hay'adda Ilaalinta Tayada	124
Hay'adda U Diyaargarawga Aafooyinka & Kayka Raashinka	126
Wasaaradda Deegaanka & Isbeddelka Cimilada	128
Wasaaradda Qorshaynta & Horumarinta Qaranka	130
Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda	132
Hay'adda Caymiska Qaranka	135
Wasaaradda Ganacsiga & Dalxiiska	137
Hay'adda Aagga Cashuuraha Ka Caaggan	139
Gudiga Qandaraasyada Qaranka	141
Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga & Wershedaha	143
Wasaaradda Jidadka & Horumarinta Waddooyinka	145
Wasaaradda Isgaadhsiinta & Teknoolojiyada	147
Wasaaradda Hawlaha Guud & Guriyeynta	149
Qasriga Madaxtooyada	151
Golaha Guurtida	153
Golaha Wakiilada JSL	155
Maxkamadda Sare	157
Maxkamadaha Hoose	159
Xeerilaalinta Guud Ee Qaranka	161
Hay'adda Shaqaalaha Dawladda	163
Machadka Shaqaalaha Dawladda	165
Hantidhawraha Guud Ee Qaranka	167
Garyaqaanka Guud Ee Qaranka	169
Wasaaradda Arrimaha Debedda & Xidhiidhka Caalamiga ah	171
Wasaaradda Cadaaladda	173
Komishanka Xuquuqal Insaanka Qaranka	175
Wasaaradda arrimaha Gudaha	177



Wasaaradda Dastuurka & Xidhiidhka Golayaasha	179
Gudiga Dib U Habaynta Shuruucda	181
Gudiga Doorashooyinka Qaranka	182
Gudiga Maamul-wanaaga & Ladagallanka Musuq-maasuqa	184
Gudiga Diwaangelinta Ururada	186
Wasaaradda Macdanta & Tamarta	188
Komishanka Tamarta	190
Wasaaradda Waxbarashada Sayniska	192
Gudiga Tacliinta Sare	195
Wasaaradda Horumarinta Beeraha	197
Hay'adda Cilmibaadhista Beeraha	199
Wasaaradda Xannanada Xoolaha & H. Reer Miyiga	201
Wasaaradda Kalluunka & Horumarinta Xeebaha	203
Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka & Wacyigelinta	205
Wasaaradda Diinta & Awqaafta	207
Wasaaradda Shaqogelinta, Arrimaha Bulshada & Qoyska	209
Wasaaradda Ciyaaraha & Dhallinyarada	212
Hay'adda Qaxootiga & Barokacayaasha	214
Ururka Mujaahidiinta	216



1 Hordhac

Miisaaniyadda 2024-ku waxay ka kooban tahay:

1. Miisaaniyadda Dawladda Dhexe
2. Miisaaniyadda Hay'adaha Madaxa-banaan
3. Miisaaniyadda Dowladdaha Hoose
4. Mashaariicda uu maalgaliyo Bangiga Adduunka ee kala ah (Barwaaqo, Abaartire, SERP, CSSP3 iyo Mashruuca SESRP)

Isugeynta guud ee Miisaaniyadda sanadka 2024-ka waa **3,432,316,337,448 SL\$H**, sida Shaxda hoose ka muuqata. Miisaaniyadda dawladda dhexe waa **2,531,631,251,889**, taas oo la mid ah Miisaaniyadii Sanadkii 2023-ka ee aan suplementry budget-ku ku jirin.

Shaxda 1: Miisaaniyadda Guud ee Qaranka ee 2024

Faah-faahinta	Miisaaniyadda 2023	Miisaaniyadda 2024	Faraqa	% Isbeddelka
Miisaaniyadda Dowladda Dhexe	2,670,674,088,858	2,531,631,251,889	-139,042,836,969	-5%
Miisaaniyadda Dowladdaha Hoose	589,899,197,085	549,637,541,872	-40,261,655,213	-7%
Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxa -banaan	277,792,895,534	250,231,092,287	-162,402,509,658	-10%
Miisaaniyadda Mashaariicda Bangiga Aduunka	263,218,961,058	100,816,451,400	-86,943,088,400	-62%
Mashaariicda (SDF, IPLG, iyo ILED)	143,880,134,300			
Grand Total	3,945,465,276,835	3,432,316,337,448	-513,148,939,387	-13%

Fiio gaara. Dhinaasha ku jira isbarbardhiga Miisaaniyadda 2024 iyo 2023 waxa uu ka yimid Miisaaniyadda 2023 waxa ku jira suplementry budget ah hantidii dowladdu iibisay badhtamihii sanadka 2023 iyo Horumarintii kiradii dekedda berbera.



2 Xaaladda Dhaqaalaha Guud Ee Dunida

Dhaqaalaha guud ee dunida waxa beryahan dambe soo wajahay caqabado badan oo isxigxigay sanadihii inadhaafay. Caqabadahaasi waxa ay ka soo bilaabmayaan Caabuuqii Covid-19, Dagaalka Yukrayn iyo Ruushka iyo Sicir-barar ka dhashay wax-soosaarkii dunida oo yaraaday. Si kastaba ha ahaatee sanadkan 2023-ka iyo sanadka inagu soo foolka leh ee 2024 waxaa suurtoagal ah in caqabadahaasi yaraadaan laakin lama hubo inta iyo sida looga soo wada kaban doono. Celcelis ahaan, Hay'adda Dhaqaalaha Dunida ee (IMF) waxa ay saadaalinaysaa in dhaqaalaha dunidu kobci doono **2.8%** sanadka 2023-ka halka uu ka kobci doono 3% sanadka soo socda ee 2024 Sidaas oo kale sicir-bararka ayaa laga soo kaban doonaa oo waxa uu hoos-uga-dhici doonaa **8.7%** oo uu joogo sanadka 2023-ka isaga oo noqon doona **7%** sanadka 2024 Arrimahaa waxaa si fiican u sharaxaya Shaxda hoose oo tilmaamaysa koboca dhaqaalaha iyo sicir-bararka dunida ee sanadahii la soo dhaafay iyo saadaalin ah sanadka soo socda ee 2024.

Maadaama dunidu dhaqaale ahaan iskuwada xidhan tahay, guud ahaan dhaqaalaha dunida ee sanadahan danbe hoos-u-dhacayay waxa uu keenay hantaaqooyin dhaqaale oo badan (Economic Shocks) kuwaas oo saamayn taban ku yeeshay dhaqaalaha Somaliland. Somaliland dhaqaalaheedu waxa uu aad ugu xidhan yahay ganacsiga, gaar ahaan wax-soodejinta kaas oo saamayn xoogani ka soo gaadhay isbedellada dhaqaale ee dunida ku yimi sanadahii la soo dhaafay iyo kuwa soo socda ee la saadaalinayaba.

Shaxda 2: Koboca Dhaqaalaha iyo Sicir-bararka Dunida 2022-2024

	Koboca Dhaqaala Dhabta ah (%) (Real GDP Growth, %)			Sicir-bararka oo Sanadle ah (%) (Annual Inflation, %)		
	2022	2023	2024	2022	2023	2024
Wadamada Hore-U-Maray	2.7	1.3	1.4	7.3	4.7	2.6
Aasiya	4.4	5.3	5.1	3.8	3.4	3.0
China	3.0	5.2	4.5	1.9	2.0	2.2
India	6.8	5.9	6.3	6.7	4.9	4.4
Bariga Dhexe Ee Aasiya	5.3	2.9	3.5	14.3	15.9	12.0
Saudi Arabia	8.7	3.1	3.1	2.5	2.8	2.3
UAE	7.4	3.5	3.9	4.8	3.4	2.0
Wadamada Saxaraha Ka Hooseeya	3.9	3.6	4.2	14.5	14.0	10.5
Ethiopia	6.4	6.1	6.4	33.9	31.4	23.5
Kenya	5.4	5.3	5.4	7.6	7.8	5.6
Djibouti	2.5	4.0	6.0	5.5	3.2	3.2
Somalia	1.7	2.8	3.7	6.8	4.2	3.8

IL-Wareed: Hay'adda Dhaqaalaha Dunida (IMF) 2023)




3 Xaaladda Guud Ee Dhaqaalaha Somaliland

3.1 Wax-Soosaarka Dhaqaalaha Guud (GDP)

Sida ay tilmaamayso war-bixinta sanadlaha ah ee ay soo saarto Wasaaradda Qorshaynta Qaranka Somaliland, Wax-soosaarka Dhaqaalaha Guud ee Somaliland ee loo yaqaano (GDP) ayaa laga arki karaa korodh ku yimi sanadkii 2022 kolka loo eego sanadkii ka horeeyay ee 2021, marka laga cabbiro xagga koboca dhaqaalaha caadiga ah ee aan loo eegin sicir-bararka (Nominal GDP). Sanadkii 2022 waxa uu dhaqaalaha guud ee Somaliland noqday 3,571 million Doolar halka uu sanadkii 2021 ka ahaa 3,297 million Doolar. Waa koboc 8.3% ah. Marka la eego inta qofkiiba ku soo hagaagaysa 769\$ ayay ahayd sanadkii 2021 halka ay 804\$ ka ahayd sanadkii 2022 (per Capita Income). Haseyeeshee, marka laga cabbiro Wax-soosaarka Dhaqaalaha Guud oo xagga sicir-bararka lagu dabaqay (Real GDP) waxa uu tilmaamayaa in sanadka 2022-ka uu ahaa dhaqaaluhu

Jaantuus 1: Wax-soosaarka guud ee Dhaqaalaha Somaliland iyo inta ku soo hagaagaysa qofkiiba 2013-2022

2,419 million Doolar halka uu ka ahaa 2,459 million Doolar sanadkii 2021. Waa hoos-u-dhac 1.6%



IL-Wareed: Wasaaradda Qorshaynta Qaranka Somaliland 2022



4 *Hantaaqooyinka guud ee ku yimid dhaqaalaha Caalamka iyo ka maxaliga ah*

4.1 Saamaynta Dhaqaale iyo Bulsho ee Dagaalka yukrayn-Saamaynta Caalamiga

Ka hore Bishii February 2022, dhaqaalaha adduunku wuxu ahaa mid ka soo kabanayey saamayntii dhaqaale ee uu kaga tagay Xanuunka safmarka ah ee Covid-19, haddana waxaa mar kale hantaaqo ku keenay duullaanka Ruushka ee Ukraine.

Dagaalku waxa uu isla markiiba yeeshay saamayn bulsho, siyaasadeed iyo mid dhaqaale oo si baahsan u saamaysay dhaqaalaha caalamka oo ay Somaliland ku jirto. Saddexda dhinac ee ugu muhiimsan ee Saameynta uu ku keenay waxay kala ahaayeen ganacsiga caalamiga ah, siyaasaddaha lacagta, iyo qaybta maaliyadda.

4.1.1 Ganacsiga caalamiga ah

Saamaynta dhaqaale ee dagaalka ukrain waxa sii xoojinaysa in labada dalba yihiin wadamada ugu wax dhoofint badan badeecooyinka Caalamka gaar ahaan: Qamadiga, bacarimiyayaasha Beeraha iyo Gaasta dabiiciga ah. Ukrain waxay dhoofisay 13.5 million tons oo qamadi ah sanadkii 2022, taas oo ka dhigaysa dalka shanaad ee ugu dhoofinta badan Caalamka, halka Ruushku ka yahay wadanka ugu dhoofinta badan gaaska dabiiciga ah

Duulaanka uu ruushku ku qaaday Ukrain waxay sababtay burburka qaybo ka mid ah kaabayaasha Dhaqaalaha Ukrain, qabsashada qaybo ka mid dhulbeerkeedka Ukrain iyo xannibaadda marinkii ay marayeen maraakiibka ka tegeysa Ukrain.

Dhamaan kuwaa aan kor ku soo sheegnay waxay si weyn u saameeyeen dhoofintii qamadiga ee Ukrain, taasi oo la saadaalinayo inay hoos u dhici doonta ilaa 50% sanadkan.

Ruushka ayaa taa beddelkeeda lagu bartilmaameedsaday cunaqabatayn dhaqaale oo reer galbeedku ku soo rogeen taas oo u dhignayd Aargoosi dagaal. Taas oo macnaheedu ahaa in reer galbeedku yareeyeen saliidi iyo gaastii dabiiciga ahayd ee laga soo iibsano jiray Ruushka. Tani waxay keentay in marqudha uu cirka isku ku shareeray qiimaha gaasta dabiicda ah, maadaama ruushku ahaa wadanka ugu dhoofinta badan caalamka.

4.1.2 Siyaasaddaha lacagta

Hoos u dhaca ganacsiga gaar ahaan, cuntada iyo tamarta ayaa saameyn weyn ku yeeshay sicir bararka caalamka. Sicir-bararka sannadlaha ah ee US, Eurozone, iyo UK ayaa ahaa **5%, 7%, iyo 12.7%** dhamaadkii sadexda bilood ee hore 2023, taas oo aad uga sarraysa halkii uu ku xasillay tobankii sano ee la soo dhaafay; Sicir bararka ayaa celcelis ahaan wax ka yar 3% ahaa intii u dhaxaysay 2000 ilaa 2020.



badiba Bangiyada dhexe ee dowladdaha waaweyn iyagoo ka falcelinaya kor u kaca sicir bararka waxay kor u qaadeen ribada ama dulsaarka, iyadoo celceliska dulsaarka guud ahaan bangiyada dhexe uu ka kacay **3.79%** ilaa **7.75%** intii u dhaxaysay bilawga 2020 iyo dhamaadka sadexbiloodka hore ee 2023. Kor u kaca degdega ah ee dulsaarka ama ribada ayaa ah kii ugu sareeyey ee la arko mudo toban sano ah, kaas oo saamayn laxaadleh ku yeeshay hab-dhaqanka maalgashadayaasha iyo Dowladdaha adduunka oo dhan; iyada oo maalgashigu hoos u dhacay sababtoo ah kharashka amaahda oo sarreeya.

4.1.3 Adeegyada Maaliyadeed

Adeegyada maaliyaddu waxay ahaayeen marin muhiim ah oo lagu dhaqan gelinayo cunaqabataynta saaran Ruushka ka dib duulaankii Ukraine. Bangiyada Ruushka ayaa lagu soo rogay cunaqabatayn dhaqaale, waxayna ku qasbanaadeen in laxanibo hantidii ka taalay dibadda. Sidoo kale waxaa ka mid ahaa in laga saaro nidaamka lacag-bixinta maaliyadeed iyo fariimaha caalamiga ah ee SWIFT. Intaa waxa dheer, Bangiga Dhexe ee Ruushka ayaa lagu soo rogay cunaqabatayn bishii March 2022, kaas oo laga joojiyay inuu isticmaalaan \$ 70bn ee kaydka lacagta qalaad si ay u dejiyaan qiimaha lacagta Ruble.

4.2 Hantaaqooyinka Guud ee ku yimid Dhaqaalaha Somaliland

Somaliland Caalamka intiisa kale ayay kaga xidhan tahay xidhiidhaha dhaqaale. Hoos-u dhaca dhaqaale ee dunida ku Yimid ee ay la yimaaddeen safmarka COVID-19, Dagaalka Ruushka iyo Ukrain, Abaaraha soo noqnoqday iyo Gubashadii Suuqa Waaheen iyo wajaale. Intaas oo is biirsatay waxa ay saamayn taban oo daran ku yeeshen dhaqaalaha maxalliga ah (sida ganacsiga oo is dhima, xawaaladaha oo hoos u dhacay, sicir-barar, cunto yaraan iyo dakhliga dawladda oo yaraaday. iwm.). Fahamka iyo saamaynta hantaaqooyinkani muhiim ayey u yihiin saadaalinta doorsoomayaasha dhaqaalaha guud iyo xulashada siyaasado hufan oo meelmar noqon kara oo Maaliyadeed iyo lacageed ee muddada dhexe.

4.2.1 Saamaynta Dhaqaale iyo Bulsho ee Dagaalka Ukraine - Somaliland

Maalgashiga Somaliland ee ganacsiga caalamiga ah waxa uu noqday mid dhaawac ka soo gaadhay dhaqaalaha caalamka ee xumaaday. Sidoo kale, ay saameeyeen dagaalka Ukraine.

Ku-tiirsanaanta badeecadaha la soo dejiyo iyo qulqulkii badeecadaha oo yaraaday ayaa sababay hoos u dhac ku yimid dhanka ganacsiga. Wax soo dejintu waxay hoos u dhacday 5% Rubuca 1aad ee 2023. Hoos u dhaca ganacsiga ee kordhay ayaa sidoo kale saameyn ku yeeshay sicir-bararka, iyadoo sicir-bararka uu ka kordhay 6.5% ilaa 10.5% Rubuca 1aad ee 2023.

Saameynta kale ee la filayo ayaa ah inay yaraato gargaarka laga filayey wadamada Qaadhaan bixiyayaasha. Wadamada qaadhaan bixiyayaasha ayaa lacag Miisaaniyad kabis ah u qoondeeyey Wadanka Ukrain, taa bedelkeeda waxa la filayaa inay yareeyaan gargaarkii ay gaadhsiin jireen wadamada soo koraya. Tani waxay sababi kartaa inay yaraato caawimadii ay Somaliland ka heli jirtay Caalamka



4.2.2 Saamaynta Caalamiga ah ee Xanuunka Safmarka ah ee COVID-19

Laga soo bilaabo dabayaaqadii Sannadkii 2019, safmarka COVID-19 waxa uu caalamka ku hayey khasaare nafeed iyo mid Dhaqaale oo sii kordhaya iyada oo 697 Million oo qof laga helay cudurka, in ka badan 6.9 Million oo dhimasho ahna la diiwaangeliyey ilaa hadda. Badbaadinta nolosha dadka iyo ka-diyaargarowga caafimaad waxa ay kelliftay in karantiimooyin la sameeyo, la kala fogaado, la xidho ganacsiyo badan. Tallaabooyinka lagu xakamaynayo cudurka ee dunidu qaadatay waxa ay culays laxaad leh saareen dhaqaalihii iyada oo ay kala gooyeen qulqulkii ganacsiga, dakhligu yaraaday, shaqo la'aani timid, ganacsiyadii xidhmeen, dakhligii dawladdu hoos u dhacay ama laga leexiyey meelihii horumarinta loogu talo galay.

4.2.3 Saamaynta Gubashadii Suuqa Wajaale

Waxa iyana sanadkan 2023 soo kordhay khasaare kale oo ah gubashadii suuqii weynaa ee ku yaalay magaalo ganacsiyeedka Wajaale. Suuqa Wajaale waxa uu ahaa suuq- gacansiyeed weyn, kaas oo u adeega iskuna-xidha guud ahaan Somaliland iyo dalka aynu jaarka nahay ee Itoobaya. Suuqani waxa uu aad saamayn weyn oo dhaqaale ugu leeyahay guud ahaan dhaqaalaha Somaliland.

Masiibadan gubasho ee dhacday waa mid si dadban iyo si toosaba saamaynteedu u taabatay qoysas badan oo ka mid ah dadweynaha reer Somaliland iyo guud ahaan Dhaqaalaha dalkaba.

Qiyaaso hor-dhac ah oo laga sameeyay Khasaaraha ka dhashay gubashadii suuqa wajaale waxa lagu qiyaasay inay ku gubatay hanti gaadhaysa 5 ilaa 6 milyan oo Dollar, kuna burbureen ilaa 74 Meheradood. Waxa kale oo ku shaqo beelay shaqaale tiro badan oo gaadhaya ilaa 300 oo ka shaqaynayay meheradaha gubtay ee suuqa Wajaale.

4.2.4 Gubashadii Suuqa Waaheen

Soo kabashadii la filayey inuu sameeyo dhaqaaluhu ka dib Covid-19, waxa markale soo wajahday masiibo kale oo baaxadleh oo ah gubashadii Suuqii weynaa ee Waaheen.

Suuqa waaheen wuxu ahaa suuq gacansiyeedka ugu weyn Somaliland, kaas oo u adeegi jiray guud ahaan Somaliland iyo Dalalka jaarkaba.

Masiibadan aan la filaynin waa mid si dab-ban iyo si toosa saamaynteedu u taabatay qoys kasta oo ka mid ah Somaliland.

Qiyaaso hor dhaca oo laga sameeyay Khasaaraha ka dhashay Gubashadii suuqa waaheen waxa lagu qiyaasay inay ku burburtay hanti gaadhaysa 1.5 ilaa 2 bilyan dollar, taas oo lagu qiyaasay inay 40% ka tahay wax soo saarka guud ee Gudaha (GDP), kuna burbureen ilaa 5,000 oo Meheradood.



5 Halbeegyada Dhaqaalaha

5.1 Sicir-bararka


Sida ay tilmaamayso Shaxda hoose oo laga diyaariyay war-bixinta billaha ah ee tusmada qiimaha Macmiilka (Consumer Price Index, CPI) ee ay soo saarto Wasaaradda Qorshayta Qaranka Somaliland, guud ahaan sicirka alaabaha kala duwan ee dalka ayaa sareeyay lixdii bilood ee hore ee sanadkan 2023 (Jan- June) marka loo eego lix-biloodkii sanadkii hore ee 2022-ka (Jan-June). Celcelis ahaan Lix-biloodkii hore ee sanadkan 2022 sicir-bararku waxaa uu gaadhay (10.21%) marka loo eego lix-biloodkii kal-hore ee 2021 oo uu ahaa (6.76%). Kor-u-kaca qiimaha alaabta oo ay ugu badan yihiin tamarta oo ay sababtay korodh ku yimi qiimaha shidaalka oo kor-u-kacay dunida iyo Somaliland-ba waxaa loo badaniyaa in uu keenay dagaalka ka dhacay dalka Ukraine iyo hantaaqooyinka dhaqaale ee kale ee ka jira gobolka iyo Somaliland.

Shaxda hoose waxa ay tilmaamaysaa celceliska isbedel ee xaddiga sicir-bararka oo isbarbardhig lagu sameeyay si rubucle ah sanadaha 2022-2023

Shaxda 3: Celceliska Rubuclaha ah ee Sicir-bararka 2022-2023

Sadex-Biloodka	Sicir-Bararka Alaabta Guud (Headline)		Sicir-Bararka Aanay Ku Jirin Cuntada iyo Tamartu (Core)		Cuntada Iyo Wixii la Xidhiidha (Food Crops & Related Items)		Tamarta, Shiidaalka & Biyaha iwm (Energy, Fuels & Utilities, EFU)	
	2022	2023	2022	2023	2022	2023	2022	2023
Rubuca 1 ^{aad}	6.46%	10.53%	5.83%	9.52%	10.20%	12.71%	6.49%	18.29%
Rubuca 2 ^{aad}	7.06%	9.90%	6.70%	7.98%	6.78%	18.95%	10.91%	15.35%
Celcelis	6.76%	10.21%	6.25%	8.72%	8.32%	15.52%	8.41%	16.76%

Jaantuus 2: Sicir-bararka Qeybaha Waaweyn oo Sanadle ah (Sanadka laga duulayo 2012)



IL-Wareed: Wasaaradda Qorshaynta Qaranka Somaliland 2022

5.2 Sarriifka Lacagta

Marka la qiimeeyo celcelis ahaan qiimaha sarriifka Lacagta shillinka Somaliland iyo doolarka ee lix biloodkii hore ee sanadkan 2023 waxaa u ahaa 8,600 SLSh, halka uu ka ahaa sarriifku lix biloodkii sanadkii hore ee 2022 8,476 SLSh. Taas oo tilmaamaysa in qiimaha shilling ka Somaliland uu hoos




u dhacay lix biloodkii hore ee sanadkan 1.4%. dhinaca kale, rubuca saddexaad ee sanadkan 2023 waxaa jirta in qiima shilling ka Somaliland oo weli hoos u sii dhacayo ilaa uu gaadhay celcelis ahaan 9,200 SLSH marka la eego suuqa sarrifka somaliland. Waxa jira dedaalo uu wado Bangiga dhexe ee Somaliland oo kaashanaya Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda iyo daneeyayaasha kale oo la rabo in wax lagaga qabto kor-u-kaca sarrifka shillingka Somaliland iyo doolarka si loogu soo celiyo inta u dhaxaysa 8,000 ilaa 8,500 SLSH/Dollar, oo ah siyaasadda bangiga Somaliand ee maamulidda sarrifka Lacagta.

Shaxda 4: Isbabardhigga Xaddiga Sarrifka Shilingka Somaliland iyo Doolarka oo Sadex-biloodle ah 2022-2023

Sadex-biloodka	2022		2023		Isbedelka Sanadlaha ah
	Sarrif	%	Sarrif	%	
Saddex-biloodka 1aad	8,515	-0.60%	8,563	0.59%	0.56%
Saddex-biloodka 2aad	8,476	-0.50%	8,600	0.43%	1.46%
Celcelis	8,496		8,581		1.01%

Jaantuus 3: Heerka Sarrifka Shilinka Somaliland iyo Doolarka oo Bille ah 2023



IL-Wareed: Baanka Dhexe Ee Somaliland, 2022

5.3 Xawaaladdaha


Iyada oo laga duulayo xogta laga soo uruuriyey bangiyada iyo Xawaaladaha ku yaala Somaliland, waxa ay sheegaysaa in lacagaha la soo xawilay lix biloodkii hore ee sanadkan 2023 ay ka yar yihiin 18% marka loo eego lacagihii la soo xawilay lix biloodkii hore ee sanadkii 2022. Dhinaca kale, lacagaha dalka laga xawilay waxay iyaguna hoos-u-dhaceen **10%** sanadkan 2023, marka loo eego lacagihii la xawilay lix biloodkii hore ee sanadkii 2022.



Shaxda 5: Lacagaha la soo diray iyo kuwa laga diray Somaliland oo Bille ah iyo Saddex-Bilood ah 2022-2023

Bisha	Lacagta La Soo Diray			Lacagta La Diray		
	2022	2023	% Isbedel	2022	2023	% Isbedel
Jan	\$120,271,704	\$88,002,957	-27%	\$236,256,083	\$284,329,712	20%
Feb	108,545,475	48,974,114	-55%	219,621,647	199,030,155	-9%
Mar	111,541,598	99,979,840	-10%	243,103,309	219,901,441	-10%
April	113,080,855	98,433,712	-13%	263,859,831	193,413,174	-27%
May	91,005,731	99,930,397	10%	246,723,031	209,346,189	-15%
June	102,597,513	95,098,572	-7%	241,950,817	203,577,854	-16%
Q1	340,358,777	236,956,911	-30%	698,981,039	703,261,308	1%
Q2	306,684,099	293,462,681	-4.3%	752,533,679	606,337,217	-19%
Total	647,042,876	530,419,592	-18%	1,451,514,718	1,309,598,525	-10%

Jaantuus 4: Lacagaha la soo diray iyo kuwa laga diray Somaliland oo Bille ah iyo Saddex-bilood ah 2022-2023



IL-Wareed: Baanka Dhexe Ee Somaliland 2022

5.4 Ganacsiga

5.4.1 Dhoofinta Xoolaha

Tirada xoolaha ee dhoofay lix-biloodkii hore ee sanadkan 2023 waxa ay dhammayd 2,317,592 neef, taas oo 53% ka badan tiradii xoolihii dhoofay lix-biloodkii hore ee sanadkii 2022 oo ahaa 1,517,036 neef.


Sida ay tilmaamayso Shaxda 6aad ee hoose, idaha iyo Riyaha ayaa markasta ugu badan xoolaha Somaliland laga dhoofiyo. Intii u dhaxaysay bilihii Jan iyo June 2023, xoolihii dhoofay oo ahaa 2.3 milyan, idaha iyo riyihu waxa ay ka ahaayeen 94% halka ay sanadkii 2022 xiligaas oo kale ka ahaayeen 94.3%. Lo'da iyo geeluna waxa ay ahaayeen 4.1% iyo 1.9% sida ay u kala horeeyaan.



Shaxda 6: Is-barbardhiga Tirada Xoolaha Dhoofay Jan-June 2022-2023

Xoolaha	2022	2023	Faraqa	Isbedelka Sanadlaha Ah (%)
Geela	27,125	43,970	16,845	62%
Lo'da	59,679	94,537	34,858	58%
Idaha & Riyaha	1,430,234	2,179,085	748,851	52%
Wadarta	1,517,038	2,317,592	800,554	53%

Jaantuus 5: Wadarta Xoolaha Dhoofay Lix-biloodkii 2022-2023



IL-Wareed: W/H/Maaliyadda /Waaxda Kastamada

5.4.2 Wax-Soodejinta

Guud ahaan sida ay tilmaamayaan Shaxda iyo jaantuska hoose, lix-biloodkii hore ee sanadkan 2023 waxa la arkayaa in uu jiray hoos-u-dhac ah 22.7% qiimaha alaabta soo degtay marka loo eego qiimaha alaabta soo degtay lix-biloodkii hore ee sanadkii 2022. Qiimaha alaabta soo degtay lix-biloodkii hore ee sanadkan 2023 waxa ay dhammayd 4.17 Tirilyan SI\$H, halka ay lix-biloodkii sanadkii hore ka ahayd 5.4 Tirilyan SI\$H. Hoos-u-dhacaas waxa lagu sababayn karaa saamayn ka timi xagga wax-soosaarka iyo isugudubka alaabihi dunida oo yaraaday, dhinaca kalena kor u kaca badeecooyinka qaaliyoobay oo saamayn weyn ku leh iyo arrimaha kale ee ah : dagaalka dabo-dheeraaday ee ka socda dalka Yukrayn, qalalaasaha dhaqaale iyo amni ee dalka aynu jaarka nahay ee Itoobiya kaas oo saamayn weyn ku yeeshay habsami-u-socodka suuq-ganacsiyeedkii magaalada Wajaale iyo xaaladaha gudaha Somaliland ee sida dagaalka Laas-caanood iyo gubashadii suuqyada Waaheen iyo Wajaale.


Dhinaca kale waxa jira dedaalo istaraatiijiyadeed iyo siyaasadeed oo ay wado dawladda jamhuuriyadda Somaliland inta awoodeeda ah oo wax lagaga qabanayo sidii xaaladda wax-soodejinta caadi loogu celin lahaa lagana qaadi lahaa wixii caqabado gudaha ah ee saamayn taban ku leh soo dejinta alaabaha iyo adeegyadaba.



Shaxda 7: Qiimaha Alaabta Soo Degtay Jan-June 2022-2023

Sanadka	Saddex-Biloodka	Qiimaha	(%) Inta Uu Isbedelay
2022	Rubuca 1 ^{aad}	2,288,120,155,965	-
	Rubuca 2 ^{aad}	3,115,392,692,388	36%
	Wadar	5,403,512,848,353	
2023	Rubuca 1 ^{aad}	2,226,633,239,379	-5%
	Rubuca 2 ^{aad}	1,950,514,526,125	-12%
	Wadar	4,177,147,765,504	-22.7%

Jaantuus 6: Qiimaha Alaabta Soo Degtay oo Bille ah 2022-2023 (Jan-June)



IL-Wareed: W/H/Maaliyadda /Waaxda Kastamada



6 Shaqaalaysiinta Dawladda 2018 ilaa 2023

Sida ka muuqata Shaxda 8aad, Laga soo bilaabo 2018 tirada Shaqaalaha Dowladda Dhexe waxay kordheen **9,860** qof, una dhiganta **(57%)**, marka la eego cel-celiska (Average) tirada shaqaaluhu kordhayeen lixdii sano ee u dambaysay waxay ahayd **(7%)**

Tani waxa ay ka tarjumaysaa heerka Adeeg kordhinta iyo fursadaha shaqo abuur ee ay Dowladdu Samaysay lixdii sano ee u dambaysay.


Korodhka tirada shaqaalaha meelaha laga xusi karo waxa ka mid ah:

- Dhalinyaradii loo qootay Mashruuca Shaqo qaran
- Shaqaalaysiintii shaqaalihii ku meel gaadhka ahaa ee Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dowladda
- Kordhinta shaqaalaha Caafimaadka
- Kordhinta shaqaalaha Waxbarashada (macalimiinta)

Shaxda 8: Shaxda korodhka Tirada Shaqaalaha Dowladda 2018-2024

Sannadka	Shaqaalaha	Isbedelka %
2018	17,240	
2019	18,838	9%
2020	20,805	10%
2021	23,686	9%
2022	24,508	3.40%
2023	26,800	9%
2024	27,100	1%

Jaantuus 7: Korodhka Tirada Shaqaalaha Dowladda 2018-2024



Il wareed: Wasaaradda H.Maaliyadda



7 **WARBIXINTA HAB-SAMI U SOCODKA MIISAANIYADDA 2023**


7.1 **Dakhli Uruurinta Jan-June 2023**

Mudadii uu dhaxaysay Jan-June, 2023 dakhli dhan 1.107.3 tirilyan ayaa soo xarooday, taas oo ka hoosaysa 2% markaa la barbar dhigo isla wakhtigaa sannadkii hore. Sidoo kale waxa muddan in la xuso in dakhli Uruurinta Jan-June 2023 ka waabsanyd bartilmaameedkii loo dhigay (-12) .

Hoos u dhaca laga dareemayo nuska hore ee sannadka 2023, ayaa loo nisbeynayaa caqabado Caalamiya iyo kuwa Somaliland u gaar ah sida: Dagaalka ruushka iyo yukrayn, saamayentii caabuqii Covid-19, qulqulkii badeecadaha oo yaraaday, gubashadii suuqa waaheen, wajaale iyo shaqaaqada ka jirta gobolka sool.


Sida ka muuqata jaantuska hoose cashuurta badeecadaha la soo dajiyo ayaa ka hooseeyey (97.3 bilyan), cashuurta iibka badeecaddaha iyo adeega ayaa iyana ah (30.6 bilyan), halka dakhliyadda aan cashuuraha ahayn ay sameeyeen waxooga hoos u dhac (2%). Sidaa darteed, waxa xusid mudan cashuurta dhoofka xoolaha waxa ka soo xarooday dakhligii ugu badnaa sanadkan.

Jaantuus 8: Shanta shay ee ugu sareeya ee ka kor maray Odoraskii iyo Shanta shay ee ugu hooseeya ee ka hoos maray Odoraskii jan-june 2023





Jaantuus 9: Wadarta Dakhli Ururinta Jan-Jun 2023 iyo Hay'addaha ka Masuulka ah



7.2 Kharash-galka Dowladda Jan-June 2023

Nuska hore ee sanadkan 2023 dawladdu waxay kharashgaraysay 1.02 trillion, taas oo ka dhigan 40.27% Miisaaniyad guud ee Dowladda Dhexe oo ahayd SLSh 2.53 trillion.

Si kastaba ha ahaatee, kharashka dhabta ah ayaa hoos uga dhacay qaddarkii loo qoondeeyay lixbiloodka hore, iyada oo uu ka hoos maray (14.74%) ama SLSh 176.13 bilyan.

Inta badan qaybaha loo qaybiyo kharashaadka ayaa laga arkayaa hoos u dhac, taas oo ka timid xannibaadihii kharash-bixineed ee la hirgeliyey rubucii labaad si la isugu dheeli tiro dakhliga iyo kharashka maadaa odoraskii dakhliga ka hoos maray bartilmaameedkii la dhigay.

Jaantuuska 11 waxa uu muujinayaa hoos u dhaca ku yimid badiba qeybaha uu ka kooban yahay kharashaadku marka la barbar dhigo isla muddadii sanadkii hore, marka laga reebo Kabka iyo keydka Qaranka.

In kasta oo uu hoos u dhac jiro guud ahaan kharashaadka nuska hore ee 2023, ayaa hadana kharash galku wuxu ka sareeyaa (4.66%) isla xiligaa xiligeedii kal hore.

Marka laga eego dhanka wadaagayaasha, dhaqaalaha, Maamulka, waxbarasha, iyo caafimaadka ayaa dhamaan ka hoos maray yoolkii kharashgal ee loo asteeyey.


Hoos u dhaca ka muuqda wadaagayaasha aan kor ku soo sheegnay waxa uu dhanyahay 135.5 bilyan , taas oo ka dhigan inay ka yihiin 76.95% hoos u dhaca guud ee kow iyo tobanka wadaage.

Marka la eego dhanka Mashaariicda, 63.34 billion slsh ayay dowladu u qoondaysay inay baxaan lix biloodka hore, taas oo ka dhigan 25.67% dhanka boqolayda. Kharashgalka dowlada ee dhanka mashaariicda ayaa waxooga ka yar marka loo eego lixdii bilood ee sanadkii hore.


Hoos u dhaca ka muuqda dhanka kharashgalka mashaariicda ayay sabab u tahay hakintii la hakiyay kharashaadka rubucii 2aad.




Jaantuus 10: kharash-galka Dowladda oo Rubucle ah 2019-2023 SL\$ Billions



Jaantuus 11: Isbarbardhiga Qeybaha waaweyn ee Kharashka oo lixbiloodle ah (2022-2023)



Jaantuus 12: kharashgalka Wadaagayaasha ee lixbiloodka Jan-June 2023





8 Siyaasada Miisaaninyada 2024

8.1 Siyaasada Mudnaanaha kharashka

Iyada oo laga duulayo sidii kor loogu qaadi lahaa baahiyaha aasaasiga ah ee Bulshada iyo dhanka horumarka ayaa gudidda dejinta siyaasada Miisaaniyadda qaranku waxay qorsheeyeen Mudnaanaha siyaasada Miisaaniyadda Qaranka Waana kuwan hoos ku xusan

1. Amniga
2. Doorashooyinka
3. Caafimaadka
4. Biyaha
5. Aqoonsi raadinta
6. Maamulka
7. Wax-soosaarka
8. Deegaanka
9. Tamarta
10. In la kordhiyo qoondada lama filaanka ee Miisaaniyadda guud
11. In la kordhiyo qoondada miisaaniyadeed ee kaydka qaranka.

8.2 Siyaasadaha kor loogu qaadayo dakhliga

Badiba cashuuraha ku xusan xeerka dakhliga ee 2016 ayaa inta badan la dhaqan galiyay hadda. Dakhli uruurinta iyo u hogaansanaanta sharciga ayaa marba marka ka dambaysay la horumarinayay, gaar ahaan cashuuraha waaweyn.

Saamiga Cashuuruhu ka yihiin wax-soosaarka guud ee gudaha (GDP) ayaa la hiigsanayaa inuu gaadho (12%) dhamaadka sanadka 2024 halka uu hadda ka yahay (9%), taa si loo gaadho waxa loo baahan yahay dib u habayn iyo dedaado dheeraada oo lagu sameeyo dakhli uruurinta.

Waana kuwan hoos ku xusan Siyaasadaha u qorshaysan Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda ee lagu horumarinayo dakhli uruurinta sanadka 2024

1. Horumarinta u hogaansanaanta sharciga cashuuraha iyo fulinta
2. Kordhinta saamiga cashuuraha berrigu ka yihiin Miisaaniyadda guud
3. Horumarinta dakhli ururinta iyo salbaadhinta cashuuraha
4. Dhaqangelinta xareynta billaha ah ee Cashuurta iibka iyo agabka
5. Xoojinta iyo taageeridda istaraatiijiyadda ballaadhinta kastamada gaar ahaan gobollada bari
6. Isticmaalka nidaamka diiwaangelinta madaxa tirinta si kor loogu qaado CashuurahaMacaashul-macashka ganacsiga, cashuurta Shaqaalaha iyo kirooyinka.
7. Ka faa'iidaydiga golayaasha degaanka cusub ee la doortay si loo xoojiyo cashuuraha IRD ee ay qaadaan Dowladdaha hoose;
8. Dhaqangelinta ganaaxyada iyo canshuuraha (tigidhada) iyo hubinta in xafiis kasta oo IRD ah uu gaaro yoolalka dakhli ururinta;
9. Dhaqangelinta cashuuraha badeecadaha iyo adeegga wax-soo-saarka warshadaha
10. Ku rakibida agabka GST (Cashuurta Badeecooyinka iyo Adeegga) ee xarumaha ganacsiga dhexe iyo kuwa waaweyn, isgaadhsiinta iyo korontada.
11. Dhaqangelinta qodobada Xeerka Dakhliga ee wax laga bedelay iyo in si buuxda loo dhaqan galiyo sharciyada cashuuraha.



9 Guud Marka Odoraska Dakhliga 2024

Wasaradda Horumarinta Maaliyaddu yoolka la hiigsanayo sannadka 2024 waxa lagu saleeyay dakhliga dhabta ee soo xarooday mudada sagaalka bilood ee sanadka 2023 . Odoroska dakhliga ee sannadka 2023-ka waxa uu noqon doonaa **2,531 Trillion (laba tiriliyan shan boqol kow iyo sodan bilyan oo shilinka SL\$)**. Korodh iyo hoos- u dhac waa ka suurto gal wadciga Somaliland haatan ka jira. Hakad ku yimi isku socodka ganacsiga caalamiga ah, Duulaanka Ruushka ee yurayn, Gubashadii suuqa waaheen, gubashadii suuqa Wajaale iyo colaadaha ka taagan Gobolka Sool ayaa la filayaa inay saamayn taban ku yeeshaan odoroska dakhliga ee sanadka 2024

Odoroska dakhliga ee sanadka 2024 ayaa lagu saleeyay siyaasada hanaanka Cashuuraha, wax-soosaarka dhaqaalaha guud ee dalka, Heerka sicir bararka iyo sarifka lacagaha qalaad, dhoofka xoolaha nool iyo dhaqdhaqaaqa ganacsiga caalamiga ah.

Wasaradda horumarinta maaliyaddu waxay is bedel ku samaysay hanaanka iyo siyaasadda cashuuraha, taasoo kor u qaadi doonta qoondada dakhliga guud ka yahay wax-soosaarka dhaqaalaha guud ee dalka (Revenue GDP ratio), isla markaana hiigsiga Wasaradda Maaliyaddu yahay in la gaadhsiiyo 14% mustaqbalka dhaw. sidoo kale kor u qaadida saamiga cashuuraha beriga ka yihiin dakhliga guud ayaa ah mudnaanta kowaad, si loo yareeyo ku tiirsanaanta Cashuuraha Kastamada oo hada ah 76% ka ah dakhliga guud ee dalka .

Koboca dakhliga ee sannadadii u dambeeyay ayaa muujinaysa koboc dakhli taasoo ku timi dedaalka iyo dib u habaynta lagu sameeyay hanaanka dakhli ururinta dalka. sidoo kale Wasaaradda maaliyaddu waxay awooda saartay hanaanka cashuur-bixinta, wacyigelinta iyo diwaangelinta cashuur bixiyaha. Odoroska Dakhliga ee sanadka 2024 oo ku salaysan aragtiyo taxader leh iyo kuwo rajo leh (togan) islamarkana u muuqda mid ka turjumaya xaaladaha dhaqaale ee dalka, hadaba odoroska Dakhliga ee sanadka 2024 waxa uu ka iman doona qaybahan soo socda.

- Cashuuraha Macaashal Macaashka iyo Faaiidada
- Cashuurta Ganacsiga Caalamiga ah
- Cashuuraha Alaabta iyo Adeega
- Deeqaha dawladdaha iyo hayadaha Caalamiga
- Dakhliga Iibka iyo Adeega Dawladda
- Dakhliga hantida sida kirooyinka hantida Dawladda

Shaxda 9: Isbarbar-dhiga Odoroska Dakhliga 2023-2024

Madax	Dakhliga ku talo-galka 2023-ka	Odoroska Dakhliga 2024	Faraq	% Guud
Ganacsiga Caalamiga ah	1,040,252,753,411	1,192,685,958,748	152,433,205,337	47%
Cashuuraha Iibka Badeecadaha & Adeega	441,511,481,187	510,857,724,375	69,346,243,188	20%
Cashuuraha Kale	269,775,710,258	305,262,800,305	35,487,090,047	12%
Dakhliga kale	302,659,687,333	302,563,343,226	(96,344,107)	12%
Cashuuraha Shaqaalaha Dawladda iyo kuwa Rayidka	138,645,015,610	150,190,802,992	11,545,787,382	6%
Macaashal Macaashka Ganacsiga iyo Faaiidada	61,910,021,017	70,070,622,242	8,160,601,225	3%
Wadarta Guud	2,254,754,668,816	2,531,631,251,888	276,876,583,072	100%

Meelaha uu ka imanaayo odoroska dakhliga 2024 ayaa kala ah (47%) Ganacsiga caalamiga, (20%) Cashuurta Iibka Badeecadaha iyo Adeega, (12%) Cashuuraha kale (12%) Dakhliyada Kale (6%) Cashuurta Shaqaalaha Dowladda iyo kuwa rayidka (3%) Macaashal Macaashka Ganacsiga iyo Faa'iidada. Dhanka kale cashuuraha dadban ee Badeecada iibka iyo Adeega (GST) oo la dardar galiyay sanadka 2023-ka ayaa si rasmiya loo dhamaystiri doonaa sanadka 2024 goobaha ganacsi ee



dhiman, taaso la filayo in ay kor u qaado wax-qabadka cashuuraha dadban ee cashuuraha berriga dalka.

9.1 Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2024


Sida ka muuqata Shaxda 11 ee hoose, Dakhliga guud ee dawladdu waxa uu ka iman doona 98.5% Kastamada iyo Cashuuraha Beriga halka 1.5% uu ka iman doono Wasaradaha iyo Hayadaha kale ee dawladda. Saamiga ugu badan waxa uu ka iman doona Kastamada 75.7% halka cashuuraha Beriga ay noqon doonan 22.7% , Geesta kale Saamiga Cashuuraha beriga ayaa sameeyay kor u kac 1% marka la barbar dhiga saamigii 2023.

Shaxda 10: Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2024

Madax	FAAHFAAHIN	HAYADAHA IYO WASARADAHA	MIISAANIYADDA
	C/Beriga	C/Beriga	575,673,386,887
	Kastamka	Kastamka	1,916,098,479,203
1420117	Daakhliga Faafinta & Iidhehda	Wasaaradda Warfaafinta iyo Dhaqangelinta	59,035,505
1420118	Dakhliga kale ee Boosaha & Isgaadhsiinta	Wasarada Isgaadhsiinta iyo Tiknolojiyada	7,001,150,000
1420107	Dakhliga Liisamada Ganac/& Ruqsooyinka	Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo dalxiiska	16,815,632,483
1410610	Dakhliga Ruqsadaha Beeraha	Wasaradda Beeraha	56,557,008
1410603	Dakh/Feega Kaluumaysiga Bada	Wasaradda Xanaanada Xoolaha iyo Kaluumaysiga	859,277,024
1410604	Dakh/Liisamada/Ruqsooyinka Macdanta	Wasaradda Macdanta iyo Tamarta	2,063,187,044
1410502	Dakhliga Kirada Guryaha & Bakhaarada	Wasaaradda H/Guud	444,416,907
1410601	Dakhliga Iibka Khayraadka Dalka	Wasarada Deegaanka iyo H.Reer miyiga	252,511,560
1410602	Income from sale of real estate	Income from sale of real estate	95,302,411
1410608	Dakhliga Ruqsadda Shirkadaha Dhismayaasha	Dakhliga Ruqsadda Shirkadaha Dhismayaasha	699,109,437
1410611	Dakhliga Kirada Warbaahinta Dibedda	Wasaaradda Warfaafinta iyo Dhaqangelinta	672,000,000
1410612	Dakhliga Kirada Xidhmooyinka Shiidaalka (Oil Blocks)	Wasaradda Macdanta iyo Tamarta	1,484,000,000
1410613	Dakhliga Kirada Xidhmooyinka Macdanta	Wasaradda Macdanta iyo Tamarta	100,000,000
1420101	Dakh/Nootaayoyinka	Wasarada Cadalada iyo garsoorka	327,637,425
1420106	Work Permits (for foreigners)	Work Permits (for foreigners)	6,421,896,654
1420110	Ruqsadda Ogolaanshaha Mihnadyaasha Caafimaadka	Komishanka mihnadyasha caafimaadka	515,726,900
1420148	Dakhliga Liisamada Boosaha & Isgaadhsiinta	Wasarada Isgaadhsiinta iyo Tiknolojiyada	688,000,000
1420119	Dakhliga Baadhista Cuntada & Daawada	Hay'adda dhawrista tayada	513,169,577
1420206	Dakhliga Ogolaanshaha Hay'addaha Caalamiga ah iyo kuwa gudaha	Wasaradda qorshaynta qaranka	790,775,863
Total			2,531,631,251,889



Jaantuus 13: Soo Koobida Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2024



9.2 Oodoros Dakhliga Kastamada oo Deegamaysan 2024

Sida ka muuqata Shaxda 11aad iyo jaantuska 14aad ee Saamiga Kastamada gobalada dalka, kastamka Berbera ayaa ah kan ugu dakhli badan kana soo xaroon doono 63.% marka la barbardhigo kastamade kale ee dalka, Kastamka Kalabaydh oo ah kastamka labaad ee ugu dakhliga badan ayaa laga filayaa 16.11% inuu soo saaro, halka kastamada Saylac iyo Madaarka Hargeisa ay saamiga guud ee dakhliga Kastamada ka noqon doonan 5.95 % iyo 5.22 % sida ay isugu xigaan. Saamiga kastamka Boorama ayaa ah 3.67% isla markaana ah kastamka shanaad ee ugu dakhli badan kastamada. Dhanka kale, kastamada kale ayaa noqon doona 5.57%.

Waxa xusid mudan in kastamka Boorama iyo Madaarka Hargaysa ay sameeyeen korodh badan marka loo eego sanadkii 2023, kuwaas oo mid waliba kordhay 3.61 iyo 1.68% siday isugu xigaan.


Shaxda 11: Oodoroska Dakhliga Kastamada ee Miisaaniyadda 2024 oo Deegaamaysan

Goobaha Kastamka	Oodoroska Kastamka 2024	Oodoroska Kastamka 2023	Faraqa	Saamiga Guud	% +
Berbera	1,208,639,991,289.33	1,285,862,332,061.00	-77,222,340,771.67	63.08%	-6%
Kalabaydh	308,730,289,582.92	313,832,983,780.00	-5,102,694,197.08	16.11%	-2%
Zaylac	114,072,154,971.25	116,575,060,522.00	-2,502,905,550.75	5.95%	-2%
Hargeisa Airport	99,935,172,503.17	67,529,013,228.00	32,406,159,275.17	5.22%	48%
Borama	70,251,882,903.31	29,317,976,636.00	40,933,906,267.31	3.67%	140%
Wajaale	25,299,514,528.46	26,379,815,888.00	-1,080,301,359.54	1.32%	-4%
Bali-gubadle	24,146,081,560.58	34,386,096,950.00	-10,240,015,389.42	1.26%	-30%
Xariirad	23,097,774,325.54	3,801,988,679.00	19,295,785,646.54	1.21%	508%
Buroa	11,690,384,511.95	3,212,815,161.00	8,477,569,350.95	0.61%	264%
Caynabo	7,446,220,550.85	2,444,914,321.00	5,001,306,229.85	0.39%	205%
Ceerigaabo	5,973,521,443.07	2,082,726,379.00	3,890,795,064.07	0.31%	187%
Hargeisa	4,262,548,642.14	1,597,108,492.00	2,665,440,150.14	0.22%	167%
Farawayne	4,100,781,206.06	3,464,979,684.00	635,801,522.06	0.21%	18%
Allaybaday	3,515,238,956.89	2,635,643,202.00	879,595,754.89	0.18%	33%
Caasha-cado	2,367,521,030.48	4,476,492,978.00	-2,108,971,947.52	0.12%	-47%
Laascaanood	1,076,361,696.80	9,204,617,068.00	-8,128,255,371.20	0.06%	-88%



Abaarso	884,976,287.78	511,743,179.00	373,233,108.78	0.05%	73%
Beer	457,243,922.04	294,452,842.00	162,791,080.04	0.02%	55%
Dilla	99,300,365.67	74,144,498.00	25,155,867.67	0.01%	34%
Lug-haya	51,518,924.33	27,427,631.00	24,091,293.33	0.00%	88%
Total	1,916,098,479,202.62	1,907,712,333,179.00	8,386,146,023.63	100.00%	0.40%

Jaantuus 14: Saamiga Goob waliba ka tahay wadarta guud ee Kastamada Miisaaniyadda 2024



9.3 Odoros-ka Dakhliga Cashuuraha Berriga 2024 oo Deegamaysan


Sida ka muuqata jaantuska 15^{aad} iyo Shaxda 12^{aad} ee hoose, Odoroska dakhliga Cashuuraha Berriga ee Miisaaniyadda 2024-ku waa (575 Billion SLSH), waxaanu ka badan yahay 4% kutalo galkii sanadkii 2023. Marka la eego dhanka Saamiga ay Goob waliba ka tahay Dakhliga guud ee Cashuuraha Berriga, Hargaysa ayaa ah tan ugu badan isla markaana laga filayaa inay soo saarto **68.67%** Wadarta Guud ee Dakhliga Cashuuraha Berriga, halka ay ku soo xigto Berbera oo noqonaysa **20.22%**, Burco **3.92%** , Boorama **3.85%** iyo Gabiley **1.77%**, Halka wadarta goobaha kale ee Cashuuraha Berrigu ka yihiin **1.57%**.



Shaxda 12: Odoraska Dakhliga Cashuuraha Berriga ee Miisaaniyadda 2024 oo Deegaamaysan

Goobaha	Odoroska 2024	Dakhliga kutalo-galka 2023	Faraqa	% Isbedelka	% Saamiga Guud
Hargeisa	395,293,681,033	364,806,093,268	30,487,587,765	8%	68.67%
Berbera	116,372,588,960	122,591,967,354	-6,219,378,394	-5%	20.22%
Borama	22,166,922,235	22,244,542,620	-77,620,385	0%	3.85%
Buroa	22,547,968,502	21,177,562,830	1,370,405,672	6%	3.92%
Gebilay	10,178,041,437	12,588,243,005	-2,410,201,568	-19%	1.77%
Ceerigaabo	5,686,378,035	5,783,609,876	-97,231,841	-2%	0.99%
Zaylac	1,465,418,721	1,383,907,261	81,511,460	6%	0.25%
Caynabo	1,284,722,530	1,262,171,506	22,551,024	2%	0.22%
Oodwayne	677,665,434	653,304,754	24,360,680	4%	0.12%
Total	575,673,386,887	552,491,402,474	23,181,984,413	4%	100%

Jaantuus 15: Saamiga Goog waliba ka tahay wadarta guud ee Cashuurha Berriga Miisaaniyadda 2024



9.4 Isbarbardhiga Dakhliga dhabta ah ee Cashuuraha Berriga 2018-2023

Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxay sanadba sanadka ka dambeeyey horumarin balaadhan ka samaysay guud ahaan dakhli uruurinta, gaar ahaan Cashuuraha Berriga.


Laga soo bilaabo 2018 ilaa 2023 dakhli uruurinta cashuuraha berriga ayaa sameeyay korodh aad u badan kaas oo ah (112%). Marka loo eego si sanadleh ah ama celceliska ay kordhayeen lixda sano wuxu ahaa (16%).

Kor u kaca dakhliga dhabta ah ee cashuuraha berriga mudadii lixda sano ee u dambeeyey ayaa ku timid dedaalada iyo casriyeynta Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu ku samaysay dakhli uruurinta sida;



- Diiwaangalinta Cashuur bixiyayaasha
- Hirgalinta Cashuurta Iibka iyo Agabka ee (GST)
- Fududeynta nidaamka cashuur bixinta
- Sal-balaadhinta Cashuuraha
- Xoojinta wacyigalinta
- Xoojinta u hogaansanaanta sharciga cashuuraha iyo fulinta
- Ku bixinta cashuurta habka electronic ah sida (Zaad iyo Edahab)
- Dhaqangalinta ganaaxyada iyo cashuurta tigidha (stump duties)
- Casriyeynta qaabka shaqada.

Jaantuus 16: Dakhli Uruurinta Cashuuraha Berriga ee 2018-2023





10 Faah-Faahinta kharashka Miisaaniyadda 2024


10.1 Saamiga Wadaagayaasha ee Miisaaniyadda 2024

Sida ka muuqata Jaantuska iyo Shaxda hoos ku taala, kharashka ku baxa Hay'addaha Amniga waxa uu Miisaaniyadda Guud ka yahay 40.65%, taas oo kuu muujinaysa in Amnigu Miisaaniyadda guud ka yahay in ku dhaw kala badh. Dhanka kale, Wadaagayaasha Dhaqaalaha, Maamulka, Waxbarashada, iyo Caafimaadku waxay Miisaaniyadda Guud ka yihiin kala badh 46.95%, halka ay Wadaagayaasha Biyaha, Deegaanka, Tamarta, Kaabayaasha Dhaqaalaha, Wax-soo saarka iyo Qaybaha kale ka yihiin 12.4%.

Shaxda 13: Soo Koobida Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miisaaniyadda 2024

Code:	Wadaagayaasha	2023	2024	Farqi	% Farqiga	% Guud
1010000:	Ammaanka	922,460,056,478	1,029,187,493,371	106,727,436,893	11.57%	40.65%
1020000:	Biyaha	66,100,327,443	33,491,466,720	-32,608,860,723	-49.33%	1.32%
1030000:	Caafimaadka	138,251,963,251	131,085,403,428	-7,166,559,823	-5.18%	5.18%
1040000:	Deegaanka	36,283,450,307	33,089,460,972	-3,193,989,335	-8.80%	1.31%
1050000:	Dhaqaalaha	497,057,905,447	380,995,125,213	-116,062,780,234	-23.35%	15.05%
1060000:	Kaabeyaasha Dhaqaale	84,576,353,654	68,051,750,692	-16,524,602,962	-19.54%	2.69%
1070000:	Maamulka	517,258,363,943	496,137,740,902	-21,120,623,041	-4.08%	19.60%
1080000:	Tamarta	14,149,197,723	12,310,982,907	-1,838,214,816	-12.99%	0.49%
1090000:	Waxbarashada	208,192,360,697	180,369,649,431	-27,822,711,266	-13.36%	7.12%
1110000:	Waxsoosaarka	67,727,914,008	57,205,867,671	-10,522,046,337	-15.54%	2.26%
1120000:	Wadaageyaasha Kale	118,616,195,907	109,706,310,582	-8,909,885,325	-7.51%	4.33%
Grand total		2,670,674,088,858	2,531,631,251,889	-139,042,836,969	-5.21%	100%

Jaantuus 17: Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miis 2024



10.1.1 Amaanka

